

Qeybta laga maamulo kuleyliyaha

Waxaan kugula talineeynaa inaad bilaha qaboowga isticmaasho qeybta laga maamulo, siiba markaad damineeyso ama daareeyso kuleyliyaha ama biyaha kulul.

Ku buuxso waqti labo ilaa sadex saacadood si kululeeyaha kuleyliyaaahaga uunan si saa' id ah ugu shaqayn qarashka aad isticmaashana kuugu yaraado.

Taasina waxeey tahay in aadan ka walwalin in aad daarto ama damiso mar kasta.

Halkan waxaan kuugu soo gudbineeynaa meesha ugu haboon ee aad geysan laheeyd.

- Waxaa marwalbo kuu haboon inaad kululeeyaha geysato maalintii labo mar, Aroorti halmar, fiidkiina halmar.
- Hadii eey qaboowtahay oo aad maalintii guriga joogto, waxaa kuu haboon inaad halmar oo dheeraad ah aad daarto.
- Waa in aad geysto saacad go'an oo kuugu haboon.
- Tusaale: subixii markaad toosto 8.00 subaxnimo waa in aad ku buuxsato in uu kululeeyuhu daarmo 7.30 subaxnimo.
- Ku xisaabtan inta uu kuugu kululaanayo iyo inta uu ku qaboobayo. Haduu kuleyliyuhu kuu daarmayo 7.30 subaxnimo guriga wuu kululaan kara 8.00 subaxnimo. Hadii aad kuleyliyuhu damiso 9.00 fiidnimo gurigana kuleyl ayuu ahaanayaa ilaa 9.30 fiidnimo.
- Xiliga bilaha kuleylka oo aadan u baahneyn kululeeyaha waxaad geysataa biyaha oo kaliyah waadna iska damin kartaa kululeeyaha.

Halkaan waxaa laguugu tusayaa tusmooyin sida aad u isticmaali doonto saacada, waxaa laga yaabaa inuu (*digital programmer*) kaagu u egyahay midka hoos ku sawiran.

- Waa in aad xaqiijisaa in saacadu waqtigeedu kuu saxan yahay.



- Markaad furto daboolka midigta ama midka ka hooseeya, waxaad geysan kartaa kululeeyaha, malintii ilaa sadax jeer in aad damin kartid daarina kartid.
- Habkan waad u isticmaali kartaa maalin walbo xiligaad doonto iyo sidaan doonto.
- Hab isticmaalka aaladani waxaa lagaa rabaa inaad saacada geeyso (*switch to auto*) adigoo riixaya labo jeer.

Waxaa laga yaaba in kululeeyahaaga (*boiler*) uu u egyahay midkan hoos ku sawiran (*mechanical programmer*)

- Falaarta dhexe waxey tilmaameysaa saacada uu marayo, waad arkeysaa waxeey ku socotaa 16.00 macnaheeduna waa 4.00 galabnimo.
- Wareeji midka dhexe si uu kuu tuso waqtiga saxda ah.
- Waa in aad riixdaa badhamada yar ee dibada ku wareegsan si aad kululeeyaha waqtigiisa u daartid, tusaale ahaan hadii aad rabtid inta



u dhaxeeya 7.30 subaxnimo ilaa iyo 9 subaxnimo, waa in aad riixdaa badhamada u dhaxeeya 7 iyo 9 (*on the dial*)

- Shidida midigtaada waxaa loo isticmaalaa kululeeyaha (*on, off or automatic*). Istickmaalka saacada geysa kuna hagaaji “*auto*” ama riix “*auto*” labo jeer.

Waxaa laga yaabaa in makiinada cabirka kuleeliyaha (*mechanical programmer*) uu u egyahay sawirkan hoose

- Xaqiiji falaarta ugu hooseeyso ee midigta dhibcaha (*dial points*) in eey tilmaanto waqtiga saxda ah.



- Badhanka buluuga iyo guduudka waxeey tilmaamayaan xiliyada kuleyliyaha ama biyaha kulul aad u baahato (*on and off*). Waa inaad waqtiyadan geysataa.
- Calaamadaha badhanka gaduudan waa xiliga aad dooneyso inuu kuleyliyaha ku daarmo (*on*), calaamadaha baluuga ah na waa xiligaa ad rabto inaad damiso (*off*)
- Waxaa jira 2 badhan (*switch*) oo midigtaada, mid waa kuleyliyaha midka kalena waa biyaha kulul. Midkaad rabto ayaad isticmaaleysaa “*off and on*” 2 mar ama 1 mar. Labo mar geysa si aad u isticmaasho.

For home energy advice, contact us on **0117 934 1957** or Freephone **0800 082 2234** or email home.energy@cse.org.uk

Hadaad u baahantahay talo ku saabsan isticmaalka korantada guryaha (luqada English ka) waxaad nagala soo xariiri kartaa: taleefoon bilaash ah **0117 934 1957** ama **0800 082 2234**; iimeylka home.energy@cse.org.uk

This is one of a series of advice leaflets in Somali produced by the Centre for Sustainable Energy.

They are free to use, and can be downloaded from www.cse.org.uk/somali-leaflets

Habka looga hortagi karo qoyaanka, dhedada ama uumiga keena (*Preventing damp and mould*)

Cabirka Korontada (*Digital Economy 7 meters*)

Dhaqaale 7 (*Economy 7*)

Ku kululeey aqalkaaga koranto (*Heating your home with electricity*)

Ka difaac Qabowga (*Insulating your home*)

Aqri cabirka korontada (*Reading your meter*)

Qeybta laga maamulo kuleyliyaha (*Setting a central heating programme*)

Talaabooyin muhiin u ah, hab isiticmaalka kuleeliyaha gaasta (*Tips on using your gas central heating*)

10 Talo oo Muhiim u ah Korantada (*Top 10 energy saving tips*)



Watch our energy advice for Somali speakers videos on YouTube at www.bit.ly/1xwXfpx



3 St Peter's Court, Bedminster Parade, Bristol BS3 4AQ

0117 934 1400

info@cse.org.uk | www.cse.org.uk



www.facebook.com/EnergySavingAdvice



www.twitter.com/@cse_bristol



www.youtube/user/csebristol

We are an independent national charity that shares our knowledge and experience to help people change the way they think and act on energy.

Switched on since 1979

Charity number 298740

Company number 2219673